

## KAALMADA DHAQAALAHAA EE ISBITAALKA & RUGTA CAAFIAADKA HUDSON

Isbitaalka Hudson wuxuu bixiyaa kaalmo dhaqaale. Macluumaadka ku saabsan u qalmitaanka, qaabka loo codsado, iyo sida dhaqaalaha gargaarka loo xisaabiyo wuxuu si buuxda ugu qeexan yahay Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha Isbitaalka Hudson. Si aad uga hesho nuqullo bilaash ah oo ku saabsan xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo foomka codsiga ee lagu buuxiyo onlaynka, si aad ugu codsato koobi bilaash ah oo laguugU soo dirayo boostada, ama in lagaa caawiyo habraaca loo maro codsiga, fadlan booqo ama ula xiriir Hudson adigoo adeegsanaya qaababka hoos ku qoran:

Barta internetka ee ciwaankeedu yahay: <http://www.hudsonhospital.org>

Goobta uu ku Yaalo: Hudson Hospital & Clinic  
Patient Financial Services  
405 Stageline Road  
Hudson, WI 54016

Telefoonka: 715-531-6200 (Adeegyada Maaliyadda Bukaanka)  
800-993-2325 (Lacag La aan)  
715-531-6201 (Adeegyada Faakiska ee Arrimaha Dhqaalaha Bukaanka)

**U QALMITAANKA:** Isbitaalka Hudson wuxuu xisaabinta la xiriirta kaalmada dhaqaalaha ku saleeyaa dakhliga reerka bukaanka marka la barbar dhigo waxa loo yaqaan Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Line, FPL). Bukaanada uu heerka tirada qoyskooda iyo dakhligoodu gaarsiisan yahay ama ka hooseeyo 200% heerka Saboolnimadfa Federaalka waxay heli doonaan qiime dhimis dhan 100%. Bukaanada uu heerka tirada qoyskooda iyo dakhligoodu gaarsiisan yahay 200% hase ahaatee uuna dhaafsiisneyn 300% heerka Saboolnimada federaaliga waxay heli doonaan qiime dhimis aan hal meel taagneyn oo gebi dhacleynaysa. Fadlan tixraac Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Hudson si aad u heshid macluumaad dheeraad ah. Haddii u bukaan ka helay Isbitaalka Hudson wax gargaar caafimaad oo deg-deg ah ama uu u qalmo taageero dhaqaale, Isbitaalka Hudson kuma soo dallici doono wax ka badan kharashyada sida caadiga ah lagu soo dallaco bukaanada haysta ceymiska caafimaadka.

**SIDA LOO CODSADO:** Si ay u codsadaan gargaar dhaqaale, bukaannadu waa inay buuxiyaan foom codsi ah oo ay ku soo celiyaan Isbitaalka Hudson qof ahaan, boostada ama faakis iyaga oo isticmaala macluumaadka ciwaanka lagala soo xiriirayo isbitaalka ee kor ku xusan. Bukaannada waxaa laga dalban doonaa inay bixiyaan caddayn xaqijinaysa dakhliga (sida canshuur celinta federaalka ee dakhliga) iyo macluumaadka ku saabsan caymiska caafimaadka ee hadda ama suurtagalka ah (sida Medicaid, Medicare, ama caymis gaar loo leeyahay). Adeegyada Dhaqaalahaa ee Bukaanada waxaa lagala xiriiri karaa lambarka telefoonka 715-531-6200. Fadlan tixraac Xeerka Gargaarka Dhaqaale ee Isbitaalka Hudson si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

TURJUMAADYADA: Turjumadyada Xeerka Gargaarka Dhaqaale ee Isbitaalka Hudson, foomka codsiga, iyo xog kooban intaba waa la heli karaa iyadoo ku qoran luuqadaha dadweynaha uu Isbitaalka & Rugta Caafimaadka Hudson u fidiyo adeegyada. Si aad u hesho nuquollo turjumaan, fadlan booqo barta internetka Hudson ama weyddiiso nuquollo adiga oo isticmaala macluumaadka xiriirka ee kor ku xusan.